



Ma ku haysataa carruur dugsiga barbaarinta ama xarunta dugsiga dabadeed? Hadda waxaanu bilaabaynaa e-adeega!

Dhammaan masuulada waa inay ku diiwaangeliyaan dakhligooda iyagoo adeegsanaya websaydkayaga. Tani waa in la hubiyo in qaansheegtaada daryeelka ilmahu ay saxtahay.

Xataa haddii aad hadda ka hor diiwaangelisay dakhligaaga, waa inaad sidaas samaysaa mar labbaad muddada wakhtiga laga **bilaabo 1 ilaa 28 Febraayo**. Haddii kale waxaa jirta khatar in kharashkaagu uu noqon doono mid khaldan.

Samee sida soo socta:

- 1 Booqo *e-adeegayaga dugsiga barbaarinta iyo daryeelka dugsiga dabadii* ee halkan:
www.flen.se/sjalvservice
- 2 Dhagsii Masuulka oo ku soo gal BankID.
- 3 Diiwaangeli dhakhligaaga.

Su'aalaha iyo jawaabaha guud

Waxaan hadda ka hor diiwaangeliyay dakhligayga, sababtee ayaan mar labbaad u samaynayaa?

– Muddada Febraayo, Degmadda Flens waxay cusboonaysiinaysaa nidaamkeeda oo dhan taas oo ku macaamisha e-adeega gudaha dugsiga barbaarinta iyo daryeelka dugsiga ka dambeeya. Laga bilaabo bilowga Maarso, waxaanu qaan sheeg u soo diri doonaa qof kasta oo ku jira nidaamka cusub. Haddii aanaan ku hayn faahfaahintaada nidaamka cusub, waxaa jirta khatar in qaansheeg laguugu soo diri doono qadarka khaladka ah.

Maxaad u beddelaysaa nidaamka?

– Hadda waxaanu horumarinaynaa heer balaadhan oo e-adeega ah gudaha degmadda Flens gebi ahaan. E-adeega ee dugsiga barbaarinta iyo daryeelka dugsiga ka dambeeya waa qayb tan ka mid ah. Waxaanu horumarinaynaa e-adeega si aanu sare ugu qaadno adeegayaga qof kasta oo ku nool gudaha degmadda. E-adeega waxa uu adiga awood kuu siiyaa, tusaale ahaan, sameeyaa codsiyada oo nooga warbixiyaa isbeddela xataa muddada fiidka, habeenada iyo dhammaadka todobaadyada iyaddoo la isticmaalayo xidhiidh internetka ah oo amni ah.

Waa maxay e-adeega?

– Adeeg koronta halka aad isticmaali karto kombuyuutar ama moobil si loo maareeyo arrimaha halkii laga diri lahaa foomam. Waxaad maarayn kartaa arrimaha saacad kasta adoo isticmaalaya e-adeega, xataa marka aanu xidhanahay.

Maxaad u baahantahay si aad u isticmaasho e-adeega?

– Si aad u isticmaasho e-adeega waxaad u baahantahay lambarka aqoonsiga shakhsiga Swedish, xidhiidhka internetka iyo BankID. Waxaad sidoo kale u baahantahay kombuyuutar, taableed ama telefoonka casriga ah.

Waa maxay BankID?

– BankID waa aqoonsiga korontada ah. Waxaad u isticmaali kartaa Mobile BankID labbadaba marka aad isticmaalayso telefoon/taable ama marka aad doonayso inaad kula xidhiidho e-adeega kombuyuutar. Dhammaan waxaad u baahantahay waa telefoon ama taableet kaas oo abka moobilkaaga BankID lagu shubayo. Mobile BankID waxaa loo isticmaali karaa moobilka telefoonada casriga ah iyo taableedyada leh xidhiidhka internetka.

Sideen ku helaa BankID?

– La xidhiidh baankaaga si aad u hesho BankID. Waa inaad haysataa lambarka aqoonsiga shakhsiga ah ee Swedishka si aad u hesho BankID.

Ma haysto lambarka qoonsiga shakhsiga ee Swedishka, maxaan sameeyaa?

– Nagala soo xidhiidh bo-buk@edu.flen.se sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah.

Kharash ku dalacee iyo sharciyada tacrifadee ayaa jirta?

– Ka akhri kharash ku dalacida iyo sharciyada tacrifada websaydkayaga:

www.flen.se/barn-utbildning/forskola/placering-och-avgifter

Haddii aad hayso su'aalo dheeraad ah oo khuseeya e-adeega, nagala soo xidhiidh bo-buk@edu.flen.se

